



JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA
Wasaaradda Caafimaadka & Daryeelka Bulshada

OGEYSIIS

BILAABASHADA QAADASHADA QEYBTA LABAAD EE TALLAALKA KA HORTAGGA COVID-19
(SECOND DOSE ROLLE OUT OF COVID19 VACCINE)

Sida Dadweynaha Soomaaliyeed ay wada ogsoonyihiin Tallaalka ka hortagga cudurka COVID-19 waa laba jeer, sidaa awgeed Wasaaradda Caafimaadka waxey dadkii horey u qaatay Tallaalkii 1aad ee cudurka Covid-19 ku wargelinaysaa in dhamaan dalka oo dhan laga bilaabay bixita Tallaalkii 2aad (Dooska Labaad), sidaas awgeed waxaa dadwaynaha lagu boorinayaa inay tagaan xaruumaha caafimaad ee loo asteeyay inay ka qaataan tallaalka 2aad (Dooska Labaad).

Dhanka kale dadka aan wali qaadan tallaalkii kowaad ee ka hortagga Covid19 waxaa la ogaysiinayaa in la bilaabay qaadashada tallaalka cusub oo la yiraahdo Sinopharm oo ay Ururka Caafimaadka Addunka ogolaansho siiyeen in loo isticmaalayo ka hortagga cudurka COVID-19. Kaasoo la xaqiijiyay inay qaadankaraan wixii ka wayn da'da 18 sano.

Wasaaraddu waxay mudnaanta koowaad ee qaadashada tallaalkaan siinaysaa Shaqaalaha Caafimaadka, Macalimiinta, Ciidamada, Shaqaalaha Dowladda Hoose, Ilaallada Kontroolada laga soo galo ee Dalka, dadka da'dooda ka sareeyso 50 sano iyo dadka qaba cudurada raaga sida Macaanka, Dhiig Karka, Wadno Xanuunka, kalyaha Xanuunka IWM. Fadlan qaado tallaalka oo badbaadi naftaada, midda qoyskaaga iyo tanbulshada.

Ugu dambayntii waxaa bulshada lagu adkaynayaa inay joogteeyaan gacma dhaqashada, qaadashada Af iyo san **xirka** , kala fogaashada, ku daboolidda afka iyo sanki tiish ama xusulkaaga marka aad qufacayso ama aad hindhisayso, hadii aad isku arakto Qandho, Qufac iyo Hindhiso ha tagin meelaha bulshada iskuyimadaan.

wixii faahfaahin ah fadlan kala xiriir taleefoonka 449.

FG: Dadka ku nool Magaalda Muqdisho waxay ka heli karaan xarumaha ku taxan shaxda hoose

NO	GOOBAHA BIXINTA TALAALLKA 2AAD	NO	GOOBAHA BIXINTA TALAALLKA 2AAD
1	Xatunta caafimaadka Degmada Wadajir	10	Xatunta caafimaadka Degmada
2	Xatunta caafimaadka Degmada Hodan	11	Xatunta caafimaadka Degmada Huriwa
3	Xatunta caafimaadka Degmada Waberi	12	Xatunta caafimaadka Degmada H-Weyn
4	Xatunta caafimaadka Degmada Karan	13	Xatunta caafimaadka Degmada Shingani
5	Xatunta caafimaadka Degmada Wardhigley	14	Xatunta caafimaadka Degmada Bondhere
6	Xatunta caafimaadka Degmada Yaqshid	15	Xatunta caafimaadka Degmada Shibis
7	Xatunta caafimaadka Degmada H/Jab-Jab	16	Xatunta caafimaadka Degmada Kaxda
8	Xatunta caafimaadka Degmada Dharkeynley	17	Xatunta caafimaadka Degmada Abdi-Aziz
9	Xatunta caafimaadka Degmada Deyninle	18	Xatunta caafimaadka Degmada UN/EU
10	Isbiataalka Hooyada iyo dhalaanka ee Benadir	19	Isbiataalka Recep Tayyip Erdoğan (Ex-Digfer)
11	Isbiataalka Demartini	20	Isbitaal Madiina
12	Isbitaal SUMAIT	21	

(DHAMAD)
10 June 2021